


Naga Caawi Casriyeynta Dugsiga Sarre ee Cleveland



Naqshada cusub oo dusha dhinacyo kala gedisan laga qaaday



Sawir dusha dhinacyo kala duwan laga qaaday ee hadda

Qorshaha Dugsiga Cusub

Waxaan dhismaha dugsiga Sarre Cleveland ka dhisi doonaa Dugsioo ka kooban afar dabaq. Dhismaha waxaa loo habeyn doonaa labo garab, fasaladda, shaybaaradda, goobaha jimicsiga iyo goobaha farshaxanka lagu soo bandhigo. Labadani garab qeybta dhexe ee dhismaha waxaa ku jiri doona barxad bannaanka ah oo ammaan ah. Albaabka weyn ee laga soo galo dugsiga wuxuu noqon doonaa jidka cinwaankiisu yahay SE 28th Avenue, una dhow jidka SE Franklin Street.

Warbixinaha Cusub ee Xilliga Gu'ga 2025

Iyada oo la raacayo tilmaamaha guddida waxbarashada ee ahaa sidii loo yareyn lahaa kharashaadka, kooxda mashruucu waxay soo saareen naqshad la cusbooneysiyeey taasi oo **illaalineysa dhammaan goobaha ay ka mid yihiin goobaha waxbarashada, ciyaaraha, iyo manhajyada dheeraadka ah ee dugsiyada sarre PPS kuwaasi oo la casriyeeyey**. Kharashaadka hoos loo dhigay wuxuu keentay in qaab dhismeedka la wanaajiyo hoosna u dhigtay dhismaha dhulka hoostiisa iyada oo dhib yareysay qaab dhismeedka kuleylka/qaboojinta. Kooxda mashruucu waxay si dadaal leh uga shaqeysay inay xaqiijiso kaydinta iyagoo illaalinaya sifooyinka naqshadeynta ee ay mudnaanta siinayaan bulshada Cleveland.

Qodobadda Muhiimka ee Qorshaha

- Goobo waxbarasho oo dhiirgalinaya iskaashiga iyo taageeradda barnaamijka International Baccalaureate ee Dugsiga Sarre Cleveland
- Labo goobo jimicsi oo cusub lagu taageerayo qoob-ka-ciyaarka/istuudiyaha legdinta iyo xarun jimicsi
- Goob qaada 500 kursi oo lagu soo bandhigo farshaxanka iyo tiyaatarka qolka madow
- Koox cusub, hoololada heesaha, iyo qolalka farshaxanka
- Barxad bannaanka ah ammaan ah taasi oo daboolan ardayduna ku kulmaan
- Dhismo dhammeystiran oo koronto ku shaqeynaya kaasi oo leh iftiin dabiici ah oo badan
- Dib-u-habeynta kor loogu qaadayo garoonka ciyaaraha CHS iyo goobta baabuurta la dhigto.
- Goobo kale oo lagu ciyaaro ciyaaraha Turf softball iyo baseball



Muuqaal barxadda xiran ah

Ka Qeybqaado

Waxaa la qaban doonaa bilaha soo socda shirar dhowra ah oo naqshada lagaga wada hadlayo iyo booqasho furan oo la soo booqanayo dhismaha. Waxaad booqataa shabakada mashruuca, haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.

Jadwalka Dhismaha Shabakada Casriyeynta Cleveland,

Maalgalinta dhismaha casriyeynta dugsiyada Cleveland iyo Ida B. Wells waxay u ka iman doonaan Sanduuqa Maalgalinta Horumarinta Dugsiyada ee doorashada cod-bixiyaasha lana qaban doono Maayo 20, 2025. Jadwalka dhismaha dugsiga Cleveland waxaa la diyaari doonaa iyada oo la sugayo natiijada ka soo baxda doorashada Maayo 20keeda. Intii lagu gudo jiray waqtiga saddexda sanno ee dhismaha, ardayda Cleveland iyo shaqaalaha waxaa loo wareeji doonaa Dhismaha Marshall ee ku yaala 92 iyo Powell.

Si joogta ah u booqo shabakada faahfaahin dheeraad ah

Shabakada casriyeynta Cleveland ee, www.pps.net/ClevelandBond waxay kula socodsiiin doontaa wixii warar ee cusub soo kordha iyada oo aad ka heli doonto liistada fursadaha shirarka la qaban doono.

